

Xafiiska Dawladda ee Socdaalka SEM
Qaybta kabitaanka dowladeed
Waaxda maamulaha maaliyadda

Fayl lambarka: 254.00-923/16/2
Taariiqda/Caalamadeena: 15.07.2022 / sem-blc

Macluumaad kooban oo ku saabsan ururinta canshuurta gaarka ah ee hantida

Magangeliyodoonka, dadka si ku meel gaar ah loo qaabilay iyo dadka magangeliyo u baahan oo haysanin ogolaasha joogitaan waxay hoos tagaan - sida ay ku qeexan tahay qodobka 86aad ee sharciga magangeliyada - canshuurta gaarka ah ee hantida.

Canshuurta gaarka ah ee hantida waxay ku saleysan tahay baaritaanka hantida. Intaas markaa lagu jiro booliiska, waaxda ilaalisa xuduudka iyo xafiisyada kale ee dawladda waxay awoodaan, inay hantida ay iska leeyihiin dadka ay waajib ku tahay inay canshuurta gaarka ah bixiyaan, si ku meel gaar ah la wareegaan. Hantida la la wareegay waxaa loo shubaayaa xafiiska dawladda ee socdaalka. Xafiiska dawladda ayaa go'aan ka gaaraaya in si toos ah la la wareegaaya hantida sida loogu gudo canshuurta gaarka ah ee hantida.

Dadka ay bixinta canshuurta gaarka ah ee hantida waajib ku tahay waa inay soo caddeyaan hantida meesha laga keenay.

Haddaa la soo caddeeyo hantida inay ka timid mushaar ee shaqo oo lagu qabtay wadanka Swiiska misa inay tahay lacag kabitaan dawladeed ah sida ceerta misa gargaarka deg dega ah, dhammaan ayaa loo soo celinaayaa shakhsiga xaq u leh.

Hanti kale haddaa la soo caddeeyo asalkeeda inuu sharci yahay, waxaa si toos ah la la wareegaayaa oo keliya wixii ka badan CHF 1000.— (qodobka 16aad faqradda 4aad ee sharci ku-xigaanka magangeliyada 2aad).

Haddaa la soo caddeeyni waayo inay hantida aa la la wareegay ka so jeedo asal sharci ah, iyada oo dhameystiran ayaa la qaadanaayaa.

Shakhsiga ay waajib ku tahay bixinta canshuurta gaarka ah hadduu tadabo bilood gudahooda kadib markuu magangeliyo misa magangeliyo ku meel gaar ah codsaday si habaysan ka tago dalka, waa loo soo celin karaa hantida oo la la wareegay (qodobka 87aad faqradda 2aad ee sharciga magangeliyada). Codsiga ee soo celinta hantida waa in loo so gudbiyaa xafiiska dawladda ee socdaalka intaana dalka laga tagin ka hor.

Caddeynta ku saabsan asalka hantida la helay iyo codsiyada ee soo celinta hantida intaana dalka laga tagin waa in lagu soo diraa adreska hoos ku qoran:

Staatssekretariat für Migration
Finanzaufsicht, Quellenweg 6,
3003 Bern-Wabern